



Amarada Ilaalinta Tilmaamaha Madaniga ah

Talaabo-Talaabo

① Ku xaraynta Maxkamadda (Ruuxa La Ilaaliyay)



Buuxi foomamkaan. Karraaniga Maxkamadda ayaa jadwal u samayn doona Dhagaysiga markaad xerayso:

- JDF 402 Cabashada/Dacwada
- JDF 442 Xaashida Macluumaadka Kiiska

Sida Loogu Baahdo:

- JDF 401 Waxyaabaha La Eego ee Dhacdada
- JDF 404 Bayaanka Caruurta Ku Saabsan

② Dhagaysiga: Amar Kumeel Gaadh ah (Ruuxa La Ilaaliyay)



Hadii la qorsheeyay, ka qayb gal dhagaysiga oo kala hadal sababta aad ugu baahan tahay Amarka Ilaalinta Maxkamadda. Hadii Maxkamadu ogolaato dalabkaaga:

- Hel Nuqullada La Xaqiijiyey ee Amarka (2+).
- Iyada oo ku xidhan xaaladaada, waxa aad u baahan doontaa nuqul la siiyo shaqada, dugsiyada, xanaanada caruurta, iwm.
- Marwalba hayso nuqulka Amarka.

③ Gaarsiinta Shakhsi Ahaaneed (Ruuxa La Ilaaliyay)



Sii nuqullo ah foomamka taliyaha bilayska deegaanka ama farriinta-qaadaha. Waxa aad isticmaali kartaa:

- JDF 98 Bayaanka Dhaarta ah ee Gaadhsiinta (Buuxi §§ 1-4)

- Dacwad/Cabasho (JDF 402).
- Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah (JDF 398).

Hadii la xereeyey, sidoo kale waxaa kamid ah:

- Waxyaabaha La Eego ee Dhacdada (JDF 401)
- Bayaanka Caruurta (JDF 404)

Farriin-gaarsiiyaha ayaa dhammaystiraya gaadhsiinta, buuxinaya foomka, oo kuu soo celinaya adiga. Ka dib, ka xaree Maxkamadda.

④ Jawaab (Qofka la Xayiray)



Wax qoraal ah oo jawaab ah looma baahna. U gudub talaabada 5.

⑤ Dhagaysiga: Amarka Rasmiga ah (labada dhinac)



Dhinacyadu waxay kala hadlayaan Maxkamadda hadii Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah laga dhigayo mid rasmi ah. Maxkamadu waxay wax ka bedeli, kordhin, ama joojin ku samayn kartaa Amarka Kumeel Gaadhka ah.

Qofka La Ilaaliyay:

- Waxa aad u baahan kartaa nuqulada xaqiijinta ee cusub.
- Waxa aad u baahan kartaa inaad dirto Amarka Ilaalinta cusub ee Qofka la Xayiray (hadii ay sidaa tahay, eeg Talaabada 3).

Marka laga tago:

- Maxkamadu waxay siinaysaa Qofka la Xayiray nuqulka dhagaysiga.
- Qofka la Xayiray ma uu iman dhagaysiga, oo wax isbedel ah laguma samaynin Amarka Kumeel Gaadhka ah.

Qofka la Xayiray:

- Si taxadir leh u akhri Amarka Ilaalinta.
- Waxaa lagugu soo oogi karaa dacwad danbi ku xad gudubka Amarka Ilaalinta.
- Kaliya Maxkamadda ayaa wax ka bedeli karta ama joojin karta amarkan.

- d) Ruuxa La Ilaaliyay ma bixin karo ogolaanshe in lagu xad gudbo amarka.

Macluumaad Dheeraad ah

Hel Foomamka

Foomamka waxaa laga heli karaa websaytka Maxkamadda:

[\[www.ColoradoJudicial.gov\]](http://www.ColoradoJudicial.gov)

Sida loo Xareeyo

Bilow nidaamka:

- Xaraynta kiiska hore. Ama,
- Ka xaraynta maxkamadda degmada ee adiga ama Dhinca Kale uu degan yahay ama ka shaqeeyo. Ama,
- Ku xaree degmada ay dhacdadu ka dhacday.

Hadii lagu xareeyo kiiska Tacadiga Xidhiidh ee Guriga Dhaxdiisa ah (DR):

- Waxaad ku xarayn kartaa onleyn:

[\[www.jbits.courts.state.co.us/efiling\]](http://www.jbits.courts.state.co.us/efiling)

Kharashka Xaraynta

Qofka La Ilaaliyay:

Qofka La Hayo:

Ma jirto wax kharash ah oo xarayn ah oo la iska qaadayo kiiska tacadiga guriga dhaxdiisa, tacadiga galmada ama daba gurista.

Kharashka Kale:

Nuqulada La Xaqiijiyay:

Inaad Gacanta ka Saarto:

Haddii aadan awoodin kharaska, sidoo kale xaree:

- JDF 205 Mooshinka ka Tanaasulida Khidmadaha
- JDF 206 Amarka Dib u celinta Khidmada Maxkamadda (La Buuxiyay §§ A-C)

Wareejinta Taleefankaaga Gacanta

Waxa aad dalban kartaa in lambarkaaga taleefanka (iyo/ama lambarka ilmaha yar) in laga soo wareejiyo xisaabka Qofka la Xayiray oo loo wareejiyo xisaabtaada. Foomamka xaraynta:

- JDF 271 A Dacwada Wareejinta
- JDF 271 B Faahfaahinta Xisaabta
- JDF 77 Amarka Lagu Taliyay (kaliya in la sameeyo A ilaa C)

Ha **Siin** (*dirin*) nuqul foomka Faahfaahinta Xisaabta (JDF 271 B) Qofka la Xayiray.

Sii shirkada taleefanka nuqulka Amarka Maxkamadda iyo foomka Faahfaahinta Xisaabta (JDF 271 B) hadii lagu siiyo.

Sharciga iyo Khayraadka Kale

- a) Sharciga ka hadla Amarada Ilaalinta ee nidaamka waxa uu ku jiraa Sharciga Dib u Eegitaanka Lagu Sameeyay ee Colorado (C.R.S.) Cinwaanka 13 (Maxkamadaha), Qodobka 14 (Amarada Ilaalinta Madaniga ah).
- b) Dhamaan wixii ah ikhtiyaarada U Gaynta Shakhshi ahaaneed, eeg C.R.S. 13-14-104.5(9) iyo Shuruucda Nidaamka Madaniga ah ee Colorado (C.R.C.P.) 4 iyo 304.
- c) Si wax looga bedelo ama loo joojiyo Amarka Ilaalinta, akhri:
 - 1) JDF 396 – Qofka La Ilaaliyay
 - 2) JDF 395 – Qofka la Xayiray

Qoraalladayda

- § macnaheedu waa "qaybo"